



Paid Leave Oregon

Iskii u shaqayste Liiska hubinta

Isticmaal liiskan hubinta si aad ugu diyaargarowdo doorashada caymiska sidii qof iskii-u-shaqeysta ee Paid Leave Oregon. Macluumaad: paidleave.oregon.gov

Paid Leave Oregon wuxuu u oggolaanayaa shaqaalaha ku nool Oregon inay qaataan fasax mushaar-bixin leh oo loogu talagalay qoyska, caafimaadka, iyo fasaxa badqabka.

Taariikhaha muhiimka ah ee ay tahay in la xasuusnaado

- | | |
|---------------------------|---|
| Janaayo 1, 2023 | Shakhsiyaadka iskood u shaqeysta waxay bilaabi karaan inay doortaan caymiska Fasaxa Mushaar Bixinta leh |
| Sibteembar 3, 2023 | Dheefaha ayaa bilaabmaya |

Haddii aad iskaa u shaqeysatid, si durba ah laguuguma dari doono caymiska Paid Leave Oregon. Waxaad dooran kartaa caymiska haddii:

- Shaqadaadu tahay Oregon dhexdeeda; iyo haddii
- Aad ka kasbatay ugu yaraan \$1,000 dakhliga saafiga ah ee Oregon ee iskaa u shaqeysiga (dakhliga ka dib kharashyadaada kugu baxay markii lagaa jaro) horaanta sanad cashuureedka ka hor inta aadan codsan.

Miyaan iskayga u shaqaystaa?

Waa kan sida Paid Leave Oregon uu guud ahaan u qeexayo waxa ay ka dhigan tahay in qofku iskii u shaqeysto:

- Haddii aad u shaqeyso ganacsigaaga badelka intii aad u shaqayn lahayd shaqo-bixiye gaar ah; iyo
- Waxaad uga warbixisaa faa'iidada ka dhalata ganacsigaaga sidii dakhli iskii u shaqayste taasoo ku aaddan canshuurahaaga.

Is diyaari

Waxaad dooran kartaa caymiska Paid Leave Oregon laga bilaabo Janaayo 1, 2023. Waxaad ka bilaabi doontaa inaad koonto ka samaysato [Frances Online](#). Waa kuwan waxyaabo ay tahay inaad maskaxda ku hayso:

- Waxaad koonto uga samayn doontaa Frances Online sidii iskii u shaqeyste.
- Haddii aad dooratid caymiska Paid Leave Oregon, waxaad u baahan doontaa inaad ogolaato inaad bixiso wax ku biirin ugu yaraan saddex sano ah.
- Waxaad u baahan doontaa nuqul ka mid ah canshuur celintaada dakhliga shakhsiyeed ee Oregon iyo federaalka sannadkii hore.

Sida loo doorto Paid Leave Oregon

Talaabada 1aad: Soo uruurso dukumeentiyadaada

Waxaad u baahan doontaa inaad diyaarsato dukumentiyada soo socda ka hor inta aadan codsan:

- Canshuur celinta dakhliga shakhsiyeed ee Oregon iyo federaalka ee sanadkii hore (haddii aadan haysan nuqul, waxaad nuqul ka codsan kartaa Waaxda Dakhliga Oregon).
- Dakhliga saafiga ah ee kaa soo gala iskaa u shaqeysiga (dakhliga ka dib kharashyadaada) ee ka socda sanad canshuureedkii hore.

Talaabada 2aad: Codso caymiska iskaa u shaqeysiga

Adeegso [Frances Online](#) si aad u codsato caymiska Fasaxa Mushaarka leh.

Talaabada 3aad: Bixi wax ku biirin saddexdii biloodba mar Kadib marka codsigaaga la ogolaado, Waaxda Shaqada ee Oregon waxay kuu soo diri doontaa kuubanooyin [coupons] loogu talagalay qadarka lacag bixinta wax ku biirinta ee lagaa rabo saddexdii biloodba mar (Shakhsiyaadka iskood u shaqeysta waxay bixiyaan qaybta shaqaalaha, 60% oo ka mid ah 1% dakhliga saafiga ah ee ka soo gala iskaa u shaqeysiga ee loo qaybiyay afar lacag-bixinood oo saddexdii biloodba mar ah). Bixi lacagta markay tahay [Revenue Online](#).

Talaabada 4aad: Xaqiijinta dakhliga sanadlaha ah Marka la gaaro Abriil 30-keeda sanad walba (ama marka la gaaro Oktoobar 30-keeda haddii aad ku xareysato canshuur celintaada kordhin), waa inaad keentaa nuqul ka mid ah canshuur celintaada dakhliga shakhsiyeed ee Oregon iyo federaalka una gudbisaa Waaxda Shaqada ee Oregon adigoo adeegsanaya [Frances Online](#).